# XEER-HOOSAADKA XISBIGA BARWAAQO

Waxaa lagu Ansixiyay Shirwaeynihii 1aad ee Xisbiga Barwaaqo

*Magaabit 2014 T.I*
*Xisbiga Barwaaqo*

**TUSMO** **BOGA**

Hordhac ....................................................................................................4

# CUTUBKA KOOBAAD

QODOBO GUUD ....................................................................... 5
Qodobka 1. Ciwaan Gaaban ............................................................... 5
Qodobka 2. Magaca Xisbiga ............................................................... 5
Qodobka 3. Astaanta Xisbiga...............................................................5
Qodobka 4. Luuqadaha Shaqo ee Xisbiga .............................................6
Qodobka 5. Wargeyska Xisbiga.............................................................7
Qodobka 6. Xarunta Guud ee Xisbiga....................................................7
Qodobka 7:- Ujeedooyinka, Mabaadii'ida, Qiyamka iyo Nidaamyada Shaqo ee Xisbiga.............................................................. 7
Qodobka 8:- Hanaanka iyo Mabaadii'da Doorashada Xisbiga...................... 12

# CUTUBKA LABAAD

II. XUBINIMADA ..................................................................13
Qodobka 9:- Xubin ka noqoshada Xisbiga ............................................13
Qodobka 10:- Codsiga xubinnimada Xisbiga .........................................14
Qodobka 11:- Xuquuqda Xubinka..........................................................15
Qodobka 12:-. Waajibaadka Xubinka.....................................................16
Qodobka 13:- Tallaabooyinka Anshax ee laga qaadayo xubnaha ku sifooba Anshax xumo.........................................................................17

## CUTUBKA SADDEXAAD

III. QAAB-DHISMEEDKA XISBIGA ..............................................20
Qodobka 14:- Qaab-dhismeedka Hoggaamineed ee Xisbiga ....................20
Qodobka 15:-. Qaab-dhismeedka koonfaransiyada Shirweynaha heer Qaran, heer Deegaan,Addhis Abeba iyo Diridhawa, heer Gobol, Magaalo, Degmo iyo Tuulo ..................................21
Qodobka 16:- Shirweynaha Xisbiga .......................................................21
Qodobka 17:- Xilka iyo Waajinaadka Shirweynaha Xisbiga ..................... 23
Qodobka 18:- Golaha Dhexe ee Xisbiga .................................................24
Qodobka 19:- Gudiga Fulinta ee Xisbiga ............................................. 26
Qodobka 20:- Golaha /Fagaarha Wadajirka Hogaaminta Xisbiga Barwaaqo ee Heer Federaal iyo .............................................................28
Qodobka 21:- Madaxweynaha Xisbiga ...................................................29

*Qodobka 22:- Madaxwayne kuxigeenada Xisbiga* ....................................29
*Qodobka 23:- Komishinka Dabagalka iyo Anshaxa* ..................................30
*Qodobka 24:-. Xafiiska Guud ee Xisbiga* ..................................................33

CUTUBKA AFRAAD

*IIV. Qaabdhismeedka Xisbiga ee Heer Deegaan* .................................... 36
*Qodobka 25:- Qaabdhismeedka Xisbiga* .................................................36
*Qodobka 26: - Nidaamka shaqo ee Koonfaransiga/kulamada/fagaarayasha Xisbiga ee Deegaanada iyo Ismaamulka Magaalooyinka Addis Ababa iyo Diridhaba* .................................37
*Qodobka 27:- Xilka iyo Waajibaadka Koonfaransiga Xisbiga*....................38
*Qodobka 28:- Gudiga hogaaminta ee heer Deegaan, Adhis ababa, Diri Dhaba iyo Xafiisyada Heer Federaal* ...........................39
*Qodobka 29:-Xafiisyada Xisbiga ee Heerarka kaladuwan* ........................ 40
*Qodobka 30:- Garabka Haweenka ee Xisbiga Barwaaqo* ......................... 42
*Qodobka 31:- Garabka Dhalinyarada ee Xisbiga Barwaaqo* ........................43

CUTUBKA SHANAAD

*V. Qodobo kala duwan* ..................................................................... 45
*Qodobka 32:- Muddo Xilleedka* ............................................................45
*Qodobka 33:- Illaha Maaliyadeed ee Xisbiga* ........................................45
*Qodobka 34:- Nidaamka shaqo ee hanaanka maamulka shaqaalaha, hantida, arrimahaMaaliyadeed iyo Diiwaanada Xisaabaad ee Xisbiga* ...................................................................45
*Qodobka 35:- Nidaamka Xalinta Khilaafaadka ka dhex yimaada Xisbiga gudahiisa*.........................................................................46
*Qodobka 36:- Nidaamka isku biirida/Midow , iskaashi iyo isbahaysi ga ee Xisbiyada kale* ............................................................46
*Qodobka 37:- Burburka Xisbiga* ......................................................... 46
*Qodobka 38:- Golaha La-talinta ee Xisbiga* ......................................... 47
*Qodobka 39:- Sarraynta Xeer Hoosaadka Xisbiga* ....................................47
*Qodobka 40:- Awooda soo saarida Awaamiirta* ........................................47
*Qodobka 41:- Hanaanka Dib U Habaynta, Wax Ka Bedelka Iyo Burinta Xeer Hoosaadkan* ............................................................48
*Qodobka 42:- Mudada Dhaqangalka Xeer Hoosaadkan* ..............................48

# Hordhac

Anagoo ah xubnaha Xisbiga Barwaaqo ayaa waxaa guntiga -dhiisha iskaga dhignay sidii aan u xaqiiijin lahayn horumarka iyo wadajirka Dalkayaga Itoobiya.

Anaga oo aamiinsan in dalkeenu u baahanyahay waji cusub, hadaf iyo taariikh cusub si loo xaqiijiyo helitaanka Itoobiya uu ka Hirgalay sarraynta sharcigu iyo nidaam dimuqraadiyadeed oo isku dheelitiraa, ilaalinta xuquuqaha shakhsi iyo kuwa kooxeed islamarkaana in la helo Itoobiya dhaqaalaheedu ku taaganyahay dhidiibo adag oo muwaadiniinteeda ka saara saboolnimada iyo dhibaatooyinka dhaqaale ee haysta sidoo kale, kaalin weyn ku yeelata fagaarayaasha heer Gobol, Qaraadeed iyo heer Calaamiba.

Anaga oo ay naga go'antahay helitaanka Itoobiya horumartay oo ku dhisan wadajir, midnimo waarta oo uu xudun u yahay nidaamka kala duwanaanshaha ee qoomiga ah.

Maadaama ay naga go'antahay in aan si wadajir ah ugu halgano dhismaha Itoobiyoo ku saleysan aragtida wadajirka iyo midnimada in loo baahanyahay in aan midayno dadaalkeena

Madaama ay lagama maar maan noqotay in la diyaariyo Xeer-hoosaad uu ku dhaqmo islamarkaana lagu maamulo Xisbiga Barwaaqo.

Hadaba, anaga oo ah Xisbiga Barwaaqo waxaan shirweynihii koobaad ee asaaska Xisbiga Barwaaqo ku go'aaminay kuna ansixinay Xeer-hoosaadkani oo ah dhokumeentiga sharci ee Xisbiga Barwaaqo kaasi oo wafaaqsan qodobada bayaanka Doorashooyinka, Diiwaangelinta Axsaabta Siyaasadeed iyo Anshaxa doorashooyinka ee tirsigiisu yahay: 1162/2011 E.C

# CUTUBKA KOOBAAD

## QODOBO GUUD

### Qodobka 1aad. Ciwaan Gaaban

Xeer-hoosaadkan waxaa loogu yeedhi karaa "Xeer-hoosaadka Xisbiga Barwaaqo"

### Qodobka 2aad. Magaca Xisbiga

Magaca Xisbigu waa "Xisbiga Barwaaqo".

### Qodobka 3aad. Astaanta Xisbiga

**1. Midabka iyo muuqaalka Astaanta Xisbiga**

*Goobo cad oo ay ku dhexyaalan Sawirka sadex qof oo ay hoosta ka hayaan labo gacmood oo leh midab madoow, iyo ilays midab huruud ah leh oo gudaha kor uga soo Ifaya.*

**2. Fasiraad kooban/Micno kooban**

*Astaantu waa mid ka turjumaysa aragtida shucuubta/ Qoomiyadaha kala duwan ee Dalkeena, midnimadeena, han-waynida Qarankeena, Nabada, iyo dimuqraadiyad iyo aragti horumaarineed.sidoo kale xidhiidhada heer Gobol iyo heer caalami oo ah kuwo ka farcamaya gudaha ilaa dibeda.*

**3. Fasiraada Faahfahsa**

**b). Gacantu: -**

▪*Sawirka gacanta qofka ee astaanta hoosta ka hayaa wuxuu ka turjumayaa in Xisbiga Barwaaqo uu yahay mid loo dhanyahay iyo ka qaybgal dhamaan buslahada. sababta midabka madoow loogu dhigaynaa waa mid ka turjumaysaa inay Itoobiya*

*hormuud iyo tusaale u tahay xornimada iyo madaxbanaanida dadyoowga madoow.*

**t). Sawirka Dadka**

- *Sawirka dadkuna waa mid ka turjumayaa in Xisbiga Barwaaqo uu yahay xisbi shacab oo u halgamaya horumarka iyo Barwaaqada bulshada, halka kala duwanaanshaha midabka sawirka dadkuna uu yahay mid Buluug, jaale iyo casaan ah oo u taagan muujinta in kala duwanaanshaha shucuubta dalkeennu ay tahayna quruxdeenna iyo adkaanshaha midnimadeenna*

**J). Falaadhaha/Shocaaca**

- *Maadaama Shocaaca falaadhaha ee korka ka saarani ay ka turjumayaan inftiin kor uga soo baxaya mugdiga ayaa waxay astaan u tahay sida Xisbiga Barwaaqo ay uga go'antahay halganka uu ugu jiro in uu Dalka Itoobiya gaadhsiiyo horumar sare oo waara.*

## *Qodobka 4aad. Luuqadaha Shaqo ee Xisbiga*

1. Xisbigu wuxuu aqoonsi siman siinayaa dhammaan luuqadaha dalkeenna.

2. Luuqada shaqo ee heer Federaal ee xisbigu waa luuqada shaqo ee Dastuurka dalku Xeeriyay iyo luuqadaha shaqo ee lagu Xeeriyay Dastuurada Dawlad Deegaanada.

3. Xafiisyada Heerarka kala duwan ee xisbigu iyaga oo ka duulaya xaalada Deegaankooda waxay ugu yaraan ku soo daarsan karaan hal luuqad oo kale oo ay ka dhigtaan luuqadooda shaqo ee Xisbiga.

## Qodobka 5aad. Wargeyska Xisbiga

1. Wargeyska Afka Xisbiga ku soo baxaa waa “Barwaaqo”.
2. Wargeyska afka xisbigu waa wargeys lagu diyaarinayo luuqado badan oo ah kuwa shaqo ee Xisbiga.
3. Iyada oo uu sidiisa yahay qodobkan qodob-hoosaadkiisa (2), ayaa hadana hadba sidii loogu baahdo loogu diyaarin karaa luuqado kale ee Dalka iyo kuwa dibadaha.

## Qodobka 6aad. Xarunta Guud ee Xisbiga

1. Xafiiska Guud ee Xisbigu waaa magaalada Addis Ababa/finfine;
2. Iyada oo ay sideeda tahay arrimaha lagu Xeeriyay farqada (1) ee Qodobkan Xisbigu waxa uu Xafiisyo ku yeelan karaa Deegaanada, Maamulo Magaalooyinka Adhis Ababa iyo Diridhawa, Gobolada, Degmooyinka, Maamulmagaalooyinka iyo Tuulooyinka.
3. Iyadoo laga duulayo baahida jirta, Xisbigu waxa uu Xafiisyo ka furan karaa Dalka dibadiisa.

## Qodobka 7aad:- Ujeedooyinka, Mabaadii’ida, Qiyamka iyo Nidaamyada Shaqo ee Xisbiga

1. Ujeedadooyinka Xisbigu waa sida hoos ku xusan:
   b). Dhismaha Dawlad-qarameed adag oo waarta oo ku dhisan midnimada qowmiyadaha iyo hanaan dimuqraadiyadeed islamarkaana haysata kalsoonida Shacabka.
   t) Dhismaha nidaam dhaqaale oo leh ka qaybgal loo dhanyahay iyo xaqiijinta ka wada faa’iideysi caddaali ah.
   j) Xaqiijinta nidaam horumaarineed oo taabogalinaya horumar Bulsho loo dhan yahay.
   x) Fulinta siyaasada xidhiidhka Arrimaha dibadda oo ku dhisan ilaalinta Karaamada Qaranka.

2. Mabaadii'da Xisbigu waa sidan hoos ku xusan
   b) Shacabnimo
   t) Dimuqraadiyad;
   J) Sarraynta Sharciga;
   x). Horumar iyo Ka faa'ideysi cadaalad ah Kh) Dhaqangalin Xaqiiqo ah
   d) Midnimo Qaran oo ku salaysan kaladuwanaanshaha Qawmiyadaha.

3. Qiyamka (Values) Xisbigu waa sidan hoos ku xusan
   B). Karaamada Shacabka iyo muwaadiniinta.
   t). Xornimo
   j). Caddaalad
   x) Midnimo qowmi ah oo xambaarsan walaaltinimo iyo is jacayl qoomi ah
   kh). Is-ixtiraam iyo is qaddarin.
   d). Midnimo ku salaysan kala duwanaanshaha qoomiga ah.
   r). Ka qaybgalin
   s). cadcadaan iyo isla Xisaabtan

4. Nidaam Shaqeedka Xisbigu waa sida hoos ku xusan:
   b). Xisbigu isagoo xurmaynaya Dastuurka Dalka iyo midka Deegaanada iyo shuruucda kale ayuu waajibaadyadiisa gudanayaa;
   t) Xubnaha Xisbiga waxa uu waajib ka saaranyahay xurmaynta iyo hirgalinta arrimaha lagu Xeeriyay farqada (1) ilaa (3) ee Qodobkan.
   j) Iyada oo ay dhawrsoon tahay xuquuqda xubnaha xisbigu u leeyihiin dhiibashada iyo meel-maarinta fikirkooda shakhsi ahaaneed ayaa haddana wuxuu wajibaad ka saaranyahay dhaqangelinta go'aamada xisbigu gaadho;
   x) Qaab-socodka hanaanka go'aan gaadhiista Xisbiga xubin kastaba waxa uu leeyahay hal cod oo keliya;

kh). Marka Go'aanka Xisbiga ee Heerarka kala duwan looga doodo nidaam dimuqraadiyadeed islamarkaana fahan midaysan laga qaato, waxaa lagu dadaali in lagu go'aan-qaato cod midaysan;

d) Marka ayna suurtogal ahayn in cod midaysan lagu ansixiyo, waxaa lagu go'aan gadhi cod hal-dheeri ah. Wuxuuna dhaqangal ku noqon cida go'aamisay iyo Qaab- dhismeedyada ka hooseyaba;

r) Hadii aan Xeer-hoosaadkani si kale loogu Xeerin, dhamaan go'aanada xisbigu waxay ku gudbayaan cod aqlaabiyad ah. Hadii codku u isle'eg noqdo waxaa la raaci dhinacauu raaco shirgudoonku;

s) Hadii aan Xeer hoosaadkan si kale loogu Xeerinin, Qaab-dhismeed kasta oo xisbigu leeyahay waxa uu kooramka shirku ku buuxsamayaa/qabsoomayaa marka ay tirada guud ee xubnaha shirweynaha ama ka qaybgalayaasha shirka ee goobta shirka jooga yihiin 50%+1 ama inka badan;

sh) Dhamaan xubnaha ay khusayso oo dhan waxaa waajib ku ah inay ka soo qaybgalaan shirarka, gaar ahaan shirarka degdega ah. Waxa reeban in si ula kac ah looga baaqdo shirka si uuna u buuxsamin kooramku, xubin kasta oo kelifa inuusan kooramku buuxsamin waxaa laga qaadi tallaabo Anshax;

dh) Go'aan kasta oo lagu gaadhay Heerarka kala duwan, hadii xubnaha shirka ka qayb galay sedex-meelood meel (1/3) ay dalbadaan/codsadaan in dib loo eego, iyada oo codsigaa/dalabkaa laga yeelanayo dood ayaa mar labaad laga go'aan gaadhi karaa;

c) Go'aan lagu gaadhay fagaare xisbi haddii cabasho laga soo gudbiyay oo cabaashadaas xal loogu helay isla fagaarahaasi, cabashadaasi mar labaad lama soo gudbin/jeedin karo. Arrinta noocaas ah waxaa cabasho laga soo jeedin karaa marka arrintaas ficil ahaan inta loo fuliyo oo saxiix qoraal ah laga

soo ururiyo xubnaha Xisbiga ayaa la horgeyn karaa kulamada ku haboon ee Xisbiga.

g) Marka la soo jeediyo cabashada ku saabsan dib u eegista go'aanka haddii cidda go'aanka gaadhay ay shirka fadhiday islamarkaana cabashada lagu soo gudbiyay qaab qoraal ama af ah waxaa lagu eegayaa qaabka ku cad qaybaha sare. Lakiin haddii lasoo xidhay ama la kala dareeray cidii go'aamin lahayd cabashada, waxaa cabashada lagu soo gudbin karaa qaab qoraal ah oo kaliya

f). Soo gudbistaha cabashadu isaga oo cabashadiisa qoraal ku soo diyaarsanaya ayuu shirgudoonka u gudbinayaa. Shir gudoonkuna isaga oo cid kasta oo ay cabashadu khusayso ku wada gaadhsiinaya wakhti kooban, ayuu suuro gelinaya inay dhamaan cidii cabashada taageersani soo wada sexeexdo. Hadii xubnaha ay khusayso 1/3 ay taageerada cabashada soo sexeexaan waxaa la suurogelin in arrintaas lagu eego shirka caadiga ah ee xiga ama shir degdega ah.

q) Dhamaan nidaam shaqeedyada xisbigu waxay noqonayaan kuwo ku salaysan cadcadaan iyo dimuqraadiyad;

k) Mawqifyada iyo go'aamada saamaynta weyn ku yeelanaya Dalka iyo dadkaba ee ay go'aamiyaan hoggaaminta sare ee xisbigu, hadii aan la go'aamin cida go'aankaas gaadhay ay u ilaaliso sir ahaan iyada oo la raacinayo sharaxaadaha ku haboon ayaa guud ahaan xubnaha loo bandhigi karaa, hadii loo baahdana Shacabka ayaa si cad loola socodsiin karaa;

l) Go'aamada iyo jihooyinka kasoo baxaa shirweynaha Xisbiga, koonferensiyada/kulamada iyo Shirarka kale ee Xisbiga waa in laga diyaariyo hadal- qoraaleed lana ansixiyo islamarkaana la xafido.

m) Xisbigu waa inuu suurtogeliyo nidaam shaqo oo lagu xafido laguna ilaaliyo arrimaha Xisbiga ee u baahan in sir ahaan si gaar ah loo ilaaliyo.

n) Xubnaha hoggaaminta Xisbiga ee Heerarka kala duwan

waxay masuuliyad guud iyo mid gaar gaar ahba ka saarantahay dhibaatooyinka ka yimaada go'aanada ay gaadheen. Sidoo kale, waxaa lagula xisaabtami haddii lagu sifoobo xil-gudasho la'aan ama Fulinta /qabashada shaqo ka baxsan awoodiisa ama wajibaadkiisa shaqo.

W) Iyadoo la eegayo hadba xalaada, talaabo-qaadka La xisaabtanku waxa uu noqon karaa mid ku salaysan Xeer hoosaadka Xisbiga ama tallaabo siyaasadeed, mid maamul ama sharci oo ku salaysan shuruucda kale ee Dalka;

h) Dhamaan xubnaha Heerarka kala duwan ee Xisbiga wuxuu waajibaad ka saaranyahay inay wakhtiga ku haboon ku soo gudbiyaan warbixin xilliyeed faahfaahinaysa waxqabadka shaqo iyo qorshayaashooda; xubnaha sarena waxa waajib ku ah inay jawaab-celin xiliyeed ay ka siiyaan/bixiyaan.

y) Xubnaha iyo Qaab-dhismeedyadu waxay yeelanayaan kulamo joogto ah oo lagu qiimeeyo natiijooyinkooda shaqo isla markaana ay isku waydaarsadaan waayo aragnimadooda dhinaca shaqada.

bb) Xisbigu waxa uu yeelanayaa nidaam lagu abaalmariyo; laguna aqoonsado Xubnaha, Hogaaminta iyo Qaab-dhismeedyada kala duwan ee guulo la taaban karo kasoo hooya hirgelinta shaqooyinka Xisbiga.

Bt) Xisbigu wuxuu hirgelinayaa jihooyin iyo nidaam shaqo oo uu kaga qaybgelinayo kuna taabo gelinayo garabka Dhalinyarada iyo Haweenka ee ka tirsan dhamaan Qaabdhismeedka heerarkiisa kala duwan.

Bj) Iyadoo xidhiidhka uu xisbigu la yeelanayo xisbiyada kale ee siyaasadeed lagu go'aaminayo Heer Qaran, ayaa hadba sida ay baahidu tahay waxay dhaqangal ku noqon karta Qaab-dhismeedyada xisbi ee hoos ku xusan.

Bx) Waxa la suurogelin nidaam horseeda in qaybaha bulshada ee laga tirada badan yahay ama taakulaynta gaarka ah u baa-

han ay dhamaan Heerarka kala duwan ee Qaab- dhismeedyada Xisbiga ku yeeshan metalaad u qalanta iyo taloobooyin wax ku ool ah. Faah-faahinta arrintaasna waxaa Awaamiir ka soo saari Golaha dhexe ee Xisbiga.

Bkh) Ujeedooyinka, barnaamijyada iyo qorshayaasha Xisbiga waxaa si buuxda u dhaqangalin Xafiiska guud ee Xisbiga, xafiisyada laamaha ee heer Deegaan, Maamulada Magaalooyinka iyo xafiisyada xisbi ee Heerarka kala duwan iyo Qaab- dhismeedyada kale ee Xisbiga ee ka jira wadamada dibaada.

Bd). Talaabooyinka Anshax maarin ee laga qaadayo xubnaha Xisbiga iyo xubin - sugayaasha Xisbiga ee ku kaca khalaadad ka dhan ah arrimaha Xisbiga waa inay noqdaan kuwo ula jeedadoodu tahay ama loola jeeddo toosinta, tayaynta iyo kor u qaadista Anshaxa iyo kartida xubnaha Xisbiga.

## *Qodobka 8aad :- Hanaanka iyo Mabaadii'da Doorashada Xisbiga*

1. Hanaanka Doorashada xubnaha Golaha dhexe, xubnaha Guddiga Fulinta. Madaxweynaha, Madaxweyne ku xigeenada Gudoomiyaha, Gudoomiyaha Kuxigeenka iyo Xoghayaha Guddiga Anshaxa iyo Dabagalka waxay noqon mid u dhacda qaab ay ku dheehantahay daahfurnaan,xor iyo cadaalad oo ku salaysan nidaam cod bixin oo qarsoodi ah.
2. Doorashada Xubnaha hogaaminta xisbigu waa inay noqota mid ilaalisa ka qaybgalka jinsiga.
3. Xubinkasta oo Xisbiga ka tirsani wuxuu hab waafaqsan Qodobka 18(8)(s) ee Xeerhoosaadkan, ee nidaamka doorashada Xisbiga lagu Xeeriyay isagoo metalaya Xisbiga waxa uu xaq u leeyahay inuu isagoo metalaya Xisbiga inuu u tartamo Doorshada guud ee Dalka, Doorashooyinka Deegaanada iyo doorashada buuxinta xubnaha baneeya kuraasta iyo doorashooyinka marlaabaad lagu celinayo .

# Cutubka Labaad

## II. XUBINIMADA

### Qodobka 9aad:- Xubin ka noqoshada Xisbiga

1.Muwaadin kasta oo Itoobiyaan ah oo buuxiya shuruudahan hoos ku xusani waxa uu kamid noqon karaa Xisbiga: -

b) In uu si buuxda u aqbalay dhaqangalinta iyo ku dhaqanka Barnaamijkasiyaasadeediyo Xeer hoosaadka Xisbiga,

t) In uu Xubinku leeyahay Anshax wanaagsan, bulshada dhex-doodana ku leh sumacad;

j). In uu Xubinku leeyahay mawqif wanaagsan, ka aaminsan (ku kalsoonyahay) yahaynidaamka qowmiga ah iyo midnimada Qaranka, isla markaana si kal iyo laab ah ula halgamaya aragtiyaha iyo falalka xagjirka ah;

x) In uu Xubinku diyaar u yahay inuu si siman ugu adeego muwaadiniinta iyo shucuubta, mudnaanta siiya danaha Shacabka, islamarkaana ka dhawrsoon musuqa iyo nidaam xumada islamarkaana kuwa kalana la halgama;

kh) Inuu si buuxda u aqbalo qiyamka iyo ujeedooyinka Xisbiga, islamarkaana ay ka go'antahay hirgalinta masuuliyadaha loo idmado;

d) In uu Xubinku diyaar u yahay bixinta qaadhaan billeedka

r). In ay da'diisu tahay 18 sano jir iyo wixii ka wayn;

s). In uusan xubin ka ahayn xisbi kale oo siyaasadeed;

sh) In uusan sharcigu ka xayuubin ama maxkamadi ka xayirin xuquuqdiisa ka mid noqoshada xisbi siyaasadeed;

dh) In uu Xubinku hab waafaqsan Xeer hoosaadkani u dhamaystay wakhtigii tijaabada.

2. Faah-faahinta Arrimaha la xidhiidha xadka da'da hawlgabka xubinnimada Xisbiga iyo Xubin sharafeednimada faahfaahintooda waxaa lagu Xeerin Awaamiirta uu soo saaro Golaha dhexe ee Xisbigu.

## Qodobka 10aad:- Codsiga xubinnimada Xisbiga

1. Muwaadin kasta oo go'aansada inuu ka mid noqdo Xisbiga waa inuu qoraal codsi Xubinimo u soo gudbiyaa Unug hoosaadka Xisbiga ee ugu dhaw goobta uu ku noolyahay ama ka shaqeeyo.

2. Iyada oo ay sideeda tahay arrinta lagu qeexay farqada (1) ee qodobkani, hadana Qaab- dhismeedyada Heerarka kala duwan ee xisbigu qofka oo ay ku qancaan inuu u hogaansamayo hirgalinta Barnaamijka iyo Xeer hoosaadka Xisbiga iyo in uu u halgamayo dhaqangalintooda waxay u soo xuli karaan xubinimo;

3. Qof kasta oo lagu soo xulay hab waafaqsan Shuruudaha ku cad farqada (1) iyo (2) qodobkan waxa uu tijaabo ahaan ku jirayaa mudo 6 bilood ah;

4. Unug Hoosaadyada xisbigu kedib marka uu ku qanco waxqabadka shaqo ee xubin sugaha wuxuu awood u leeyahay inuu u soo gudbiyo Unug aasaasiyada Xisbiga si uga go'aan gaadhaan xubinnimadiisa ama xilliga tijaabada u kordhiyo wakhti aan ka badnayn saddex bilood; xubin suge kasta oo aan ku qancin go'aanka Unug asaasiga wuxuu xaq u leeyahay inuu cabasho u gudbisto Qaab-dhismeedka xisbi ee ka sareeya.

5. Mudada xubin sugenimada lama kordhin karo wax hal mar ka badan geedisocodka dabagalkana waa la joojini.

6. Xubin suguhu mudada uu ku jiro xilliga tijaabada waxa uu gudanayaa waajibaadyada uu xisbigu u xilsaaro;

7. hanaanka xulashada xubnaha, kobcinta, hawl-gelinta, meelaynta, halbeega qiimaynta/darajo- siinta waxqabadka iyo sagootinta xubnaha Xisbiga oo faahfaahsan waxaa Awaamiir ka soosaari Golaha dhexe ee Xisbiga.

## Qodobka 11aad :- Xuquuqda Xubinka

1. Qofkasta oo Xubin buuxa ka ah Xisbiga waxa uu leeyahay xuquuqahan hoos ku xusan: b). Inuu wax doorto lana doorto;
   t) Inuu Ka qaybgalo shirarka Xisbiga, ka qayb qaadashada doodaha iyo inuu cod ka dhiibto arrimaha codka lagu go'aaminayo, inuu arrin walba fagaarayaasha sharciga ah af ahaan iyo qoraal ahaanba ku soo bandhigo fikirkiisa;
   j). Inuu xubin ama qaabdhismeed kasta oo ka tirsan Xisbiga u soo jeediyo dhaliilo wax ku ool ah xambaarsan cadaymo dhab ah.
   x) Xubinkasta hadii uu ku qanci waayo go'aankasta oo uu xisbigu gaadhay, wuxuu hab wafaaqsan Xeer hoosaadkan uu cabashadiisa u gudbin karaa Qaab-dhismeedka ay khusayso.
   kh). Inuu arrinkasta oo la xidhiidha shaqsiyadiisa iyo Xisbigaba oo ay tahay inuu wax ka ogaado wuxuu xaq u leeyahay inuu weydiiyo ilaa Golaha dhexe oo uu jawaab waafi ahna laga siiyo;
   d). Inuu xubnaha/ dadka kale la socodsiiyo Xeer hoosaadka Xisbiga, Barnaamijka siyaasadeed, mawqifyada iyo go'aanada Xisbiga, sidoo kalena baro oo uu ku hanuuniyo islamarkaana uu suurogeliyo dhaqangelintooda;
   r). Hadii uu rabo in uu kaboxo oo uu qoraal ku soo gudbiyo waa inuu wixii hanti ah ee uu gacanta ku hayo isaga oo qoraal ku soo gudbinaya uu si masuulliyadii ku dheehantahay ugu soo celiyo Xisbiga.
2. Xubin suge kasta ma laha xuquuqda u codaynta doorashooyinka xubnaha Xisbiga ee Heerarka kala duwan iyo in isaga loo doorto toona, hase ahaatee, isaga oo dhamaan xuquuqaha kale ee xubnaha caadiga ahi leeyihiin helaya ayuu dhanka kalana leeyahay gudashada waajibaadka loo idmado.

## *Qodobka 12aad:-Waajibaadka Xubinka*

Xubin kasta oo ka tirsan Xisbiga waxaa saaran waajibaadyada hoos ku cad: -

1. Waxaa ku waajibay inuu Mar walba iyo meel kasta oo uu joogo sida kucad Xeer hoosaadka uu hab wafaaqsan Xeerarka Xisbiga uu ogaado, aqbalo, ixtiraamo, u hogaansamo islamarkaana uu dhaqangalintooda kaalin hormuudnimo ka qaato Barnaamijka siyaasadeed ee Xisbiga, Xeer hoosaadka Xisbiga, Awaamiirta Xisbiga ee la ansixiyay, go'aanada iyo qorshayaasha Xisbiga;

2. Inuu qaabkasta oo shaqo ee uu ku hawlanyahay iyo heerkasta oo masuuliyadeed ee uu hayaba, uu ka qaybgal buuxa ku yeesho ilaalinta iyo xoojinta midnimada, adkaynta iyo tayaynta Xisbiga iyo sugida araa'ada siyaasadeed ee Xisbiga;

3. In uu ixtiraamaa mabaadii'ida, qiyamka iyo shuruucda Anshaxa ee xubnaha Xisbiga iyo sidoo kale ilaalinta iyo dhawrista amniga iyo madaxbanaanida Shacabka iyo Dalka;

4. In uu Xurmeeyaa una hogaansanadaa shuruucda Dalka iyo go'aamada kala duwan ee Dowlada.

5. In uu fashiliyo lana halgamo ficil kasta iyo aragti kasta oo wiiqi karta/waxyeeli karta midnimada,wadajirka iyo tayada Xisbiga;

6. Inuu ka taxadiro inuu qaybaha warbaahinta la wadaago mawqifyada ay shakhsiyaad ama koox gaar ahi qabaan isaga oo kadhigaya mawqif xisbigu leeyahay;

7. In uu ka dhawrsoonaado facilada dhawici kara ama wiiqi kara xidhiidhkawanaagsan ee xubnaha Xisbiga;
8. Sida lagu tilmaamay Qodobka 18aad qodob hoosaadka (8) xarafka (dh) inu hab waafaqsan Awaamiirta uu golaha dhexe ku soo saaray noocyada qaadhaan ee la waajibiyay iyo qaababka loo bixinayo inuu ku bixiyo qaadhaanka xubinnimo.

9. Inuu sida ugu haboon u ilaaliyo una isticmaalo hantida Xisbiga;

10. Waxa uu waajib ka saaran yahay inuu nadiif ka ahaado musuqa iyo eexda, sidoo kalana fashiliyo lana halgamo;

11. Markasta oo uu si joogto ah uga wareego ama bedesho goobta shaqo waa inuu ku wargaliyo Qaab-dhismeedka Xisbiga ee uu ka tagay iyo Qaabdhismeedka xisbi ee ka jiraa goobta cusub ee u uu wareegay, islamarkaana hantida iyo macluumadka xisbi ee uu gacanta ku hayay uu ku wareejiyo Qaabdhismeedka xisbi ee ka dhisan Meesha u ka tegay ama wareegay.

## *Qodobka 13aad :- Tallaabooyinka Anshax ee laga qaadayo xubnaha ku sifooba Anshax xumo*

1. Xubin kasta oo ku sifooba arrimaha/xaaladaha hoos ku cad wax-aa laga qaadi karaa tallaabooyin Anshax maarin oo ka bilaama digniin afka ah ilaa ka saarida xubinimada Xisbiga:
   1.1. Xubin ama xubin suge kasta oo ku xadgudba Barnaamijka siyaasadeed ee Xisbiga, Xeer hoosaadka Xisbiga, go'aana-da iyo Awaamiirta Xisbiga, ama ku kaca fal- dembiyeedyo kale, iyada oo la eegayo hadba culayska dambiga ayaa laga qaadayaa tallaabooyin Anshax marin oo u dhigma;
   1.2. Xubin kasta oo ka tirsan Xisbiga oo muddo 6 bilood oo tax-

ane bixin waayo qaadhaan- bileedka, isaga oo aan haysan sababo lagu qanci karo isla markaana aan diyaar u ahayn bixinta qaadhaan bileedka ku ururay, waxaa loo qaadanayaa inuu rabitaankiisa kaga tagay xubinimada Xisbiga;

1.3.Xubin kasta oo ka tirsan Xisbiga oo isaga oo aan xog dhab ah ka duulayn sameeya xulashada xubno cusub ama xubin ka cayriya xubinimada ama soo eedeeya,dacweeya xubnaha waxaa lala tiigsan talaabada ku haboon ee Anshax marin;

1.4.Xubin kasta oo ka tirsan hogaaminta ama xubnaha Xisbiga waxaa ka reeban bixinta iyo isticmaalka warbixin been ah.

1.5.Xubinkasta oo ka tirsan Xisbiga Waxaa ka reeban inuu Xisbiga ka dhex abuuro ama fidiyo kooxaysi iyo isbaahaysi;

1.6.ubinkasta oo la ogaado inu xubin ka yahay xisbi kalw oo siyaasadeed.

1.7.Iyada oo ay qodobada kor kuxusan sidooda yihiin hadana hadii xubinka lagu helo faldambiyeedaya uu sharciga dalku u qeexay dambi ahaan waxaa lagula xisaabtami nidaamka Xisbinimo.

1.8.Xubnaha iyo xubin sugayaasha Xisbiga iyada oo loo eegayo culayska fal dembiyeedka ay ku kaceen ayaa laga qaadi tallaabooyinka Anshax marin ee hoos ku cad:-

1.8.1.adii uu yahay Xubin Buuxa

b. Waxaa loo soo jeedin Dhaleecayn/canaan;

t. waxaa la siin digniin af ah

j. waxaa la siin digniin qoraal ah;

x. waxaa laga xayiri/joojin Masuuliyada/shaqada;

kh. waxaa laga caydhiin Masuuliyada.

d. Waxaa hoos looga dajin xilka masuuliyadeed ee uu hayo

r. Waxaa laga joojin/hakin Xubinimada.

s. Waxaa laga xayuubin Xubinimada;

1.8.2.Hadii uu Yahay Xubin suge

b) In mudada xubin sugenimada loogu kordhiyo hal mar oo tijaabo ah;

t) In laga cayriyo xubin sugenimada

1.9. Xubin ama xubin suge kasta oo laga qaaday tallaabooyinka ku xusan qodob- hoosaadka (1) ee sare cabashadiisa waxa uu u soo gudbisanayaa Komishinka Dabagalka iyo Anshaxa ee Heerarka kala duwan;

1.10.Habka tallaabo qaadista Anshax xumada xubnaha iyo dhaqangalinta Anshax marinta waxaa loo dhaqangalin hab waafaqsan Awaamiirta uu soo saaro Golaha dhexe.

# Cutubka Saddexaad

## III. QAAB-DHISMEEDKA XISBIGA

### *Qodobka 14aad: - Qaab-dhismeedka Hoggaamineed ee Xisbiga*

1. Jaran-jarooyinka Qaabdhismeedka xisbigu waa mid waafaqsan nidaamka Federaaliga ah ee lagu Xeeriyay Dastuurka. Sidaasi awgeed Xisbigu wuxuu yeelan Qaab dhismeedkan hoos ku xus-an.

   b) Federaal;

   t). Deegaan, Addhis Abeba iyo Dhiridhawa j). Gobol/Magaalo-/ tuulo;

   x) Degmo /maamul magaalo/Magaalo hoosaad; iyo

   Kh) Heer Tuulo

2. Xisbigu waxa uu yeelanayaa Qaabdhismeed-hayadeedka ee hoos ku cad:

   b). Shirweyne Qaran;

   t). Guddiga Golaha dhexe;

   j). Gudiga Fulinta

   x). Golaha /fagaaraha wadajirka Hogaaminta Xisbiga ee Heer Fadaraal iyo Heer Deegaan.

   kh. Madaxweyne;

   d). Madaxweyne-ku-xigeeno

   r) Komishinka Dabagalka iyo Anahaxa. s). Xafiiska Guud ee Xisbiga

   sh). Xafiiska Laamaha Xisbiga ee Deegaanada

   dh). Garabka Haweenka ee Barwaaqo.

   c). Garabka Dhalinyarada ee Barwaaqo;

   g). Unug aas aasiyada iyo Unug hoosaadyada Xisbiga

3. Unug aas aasiyada iyo Unug hoosaadyada Xisbiga waxaa lagu dhisi waxaa lagu dhisi goobta ay ku noolyihiin ama goobtooda shaqo

## Qodobka 15aad:-. Qaab-dhismeedka koonfaransiyada Shirweynaha heer Qaran, heer eegaan,Addhis Abeba iyo Diridhawa, heer Gobol, Magaalo, Degmo iyo Tuulo

1. Shirweynaha Xisbiga waxa lagu qaban heer Qaran

2. Hadaba sida loogu baahdo ayaa Heer Deegaan iyo Heerarka kaleba sida Gobalada, Maamul Magaalooyinka iyo Qabaleeyada waxaa lagu qaban karaa kalafadhiyo/kulamo/fagaarayaal

3. Xubnaha Xisbiga Barwaaqo ee Qaabdhismeedyada heer fadaraal waxay yeelanayaan kalafadhi/kulamo/fagaaryaal u gaar ah.

\4. Xulashada ergooyinka ka qaybgalaya kalafadhi/kulamo/ fagaaryaal u gaar ah xisbigu waxay noqon kuwo lagu saleeyo tirada xubnaha Xisbiga, tirada dadwaynaha iyo kaladuwanaanshaha iyada oo loo dhisayo qaab xaqiijinaya metalaada Qowmiyadaha iyo shucuubta laga tirada badan yahay.

5. Ergooyinka Shirwaynaha caadiga ah iyo kalafadhiyada/kulamada/fagaarayaasha kala duwan waxaa ka qaybgali ergooyin iyo xubno karti leh.

## Qodobka 16aad:- Shirweynaha Xisbiga

1. Shirweynaha Guud ee Xisbigu waa Hay'ada ugu sarraysa ee Xisbiga.

2. Shirweynaha caadiga ee xisbigu wuxuu qabsoomayaa labo sano

iyo badh Hal mar. hase yeeshe mudada qabaashada Shirweynuhu sinaba ugama badan karo sadex sano.

3. Madaxwaynaha Xisbigu waa shirgudoonka shirweynaha, halka Madaxweyne ku xigeenaduna ay yihiin shir-gudoon ku xigeenayaal.

4. Tirada ka qaybgelayaasha shirweynaha caadiga ah iyada oo ay noqonayso 500 xubnood iyo waxa ka badan ayaa Golaha dhexe waxa uu Awaamiir kasoo saari isku dhafnaanta xubnaha ka qaybgalayaasha iyo ka koobnaanta qaybaha kale duwan ee bulshada islamarkaana la xaqiijiyo in Qowmiyada/shucuubta laga tiro badanyahay inay helaan metalaad.

5. Shirweyne degdeg ah waxaa la iclaamin /yeedhi karaa marka ay xubnaha golaha dhexe ee xisbigu ku go'aamiyaan cod dhan 1/3.

6. Komishinka dabagalka iyo Anshaxa ee xisbigu hadii ay cod taageero ah oo u dhigma 1/3 ka helaan xubnaha joogtada ah ee shirweynaha, waxay codsan karaan in la qabto shirweyne degdeg ah.

7. Marka loo yeedho Shirweyne Xisbi oo degdega ah waxa si toos ah uga qayb galaya xubnihii ka qayb galay shirweynihii caadiga ahaa ee hore Xisbiga.

8. Kooramka shirka caadiga ee xisbigu wuxuu ku qabsoomi kara Marka ay ka soo qaybgalaan ugu yaraan 2/3 xubnaha Xisbiga.

9. Shirweynaha Degdega ah waxa uu ku qabsoomi karaa Marka ay ka soo qaybgalaan ugu yaraan 50%+1 xubnaha xisbigu.

10. Xubnaha Golaha dheexe iyo xubnaha Komishinka Dabagalka iyo Anshaxu waxay si toos ah uga qaybgeli shirweynaha Xisbiga,

11. Iyadoo tirada metalaada ka qaybgelayaasha shirweynaha xisbigu tahay mid ku salaysan Tirada guud dadweynaha,tirada xubnaha Xisbiga iyo tixgalinta kaladuwananshaha ayuu golaha dhexe ka soo saari Awaamiir faah-faahineysa.

12. Xafiiska Guud ee Xisbiga waa inuu kahor qabsoomida shirka uu faafiyaa Taariikhda, Goobta iyo ajandeyaasha Shirweynaha caadiga iyo shirweynaha degdega ee Xisbiga .

## *Qodobka 17aad:- Xilka iyo Waajinaadka Shirweynaha Xisbiga*

1. Xilka iyo waajibaadyada Shirweynaha xisbigu waa sidan hoos ku xusan: -
   - b). Waxaa uu ansixiyaa ama wax kabadalaa Xeer Hoosaadka iyo Barnaamijka siyaasadeed ee Xisbiga
   - T) Waxa uu dejiyaa jihooyinka guud iyo go'aanada lagu hoggaaminayo Xisbiga; j). Waxa uu go'aamiyaa tirada xubnaha Komishinka dabagalka iyo Anshaxa.
   - x) Waxa uu dhegeystaa, qiimeeyaa, ka doodaa isla markaana ansixiyaa warbixinaha ay u soo gudbiyaan golaha dhexe, Komishinka dabagalka iyo Anshaxa iyo sidoo kale Qaabdhismeedka kale ee Xisbiga;
   - kh). Waxa uu ansixiyaa ra'yi go'aameedka midowga ama iskaashiga uu xisbigu la yeelanayo xisbiyada kale ee siyaasadeed.
   - d). Waxa uu go'aamiyaa xayiraada iyo cayrinta/sagootinta xubnaha golaha dhexe iyo xubnaha Komishinka dabagalka iyo Anshaxa;
   - R) Waxa uu ansixiyaa, dib u habeeyaa, badalaa magaca iyo as-

taanta Xisbiga;

S) Wuxuu doorta Xubnaha golaha dhexe, Gudiga Dabagalka iyo Baadhista, madaxwaynaha iyo Madaxweyne ku xigeenada Xisbiga;

sh) Ka hor inta uuna Shirweynuhu bilaabin shirkiisa caadiga ah ayuu baadhayaa isla markaana ansixinayaa warbixinta ku saabsan diyaargaroowga iyo Qaab-scodka shirka ee ay soo gudbiyeen gudiga qaban-qaabada shirweynaha.

2. Iyadoo ay sideeda tahay arrimaha lagu Xeeriyay farqada (1) ee Qodobkan, Shirweynuhu qayb ahaan ama guud ahaan wajibaadkiisa shaqo u wakiilan kara Golaha dhexe Xisbiga.

## *Qodobka 18aad: - Golaha Dhexe ee Xisbiga*

1) Golaha dhexe waxaa uu hoos tagtaa shirweynaha waana hay'adda leh awooda hoggaamineed ee Xisbiga mudada u dhaxaysa labada shirweyne;
2) Golaha dhexe waxa uu ka unkaama/aas-aasmayaa xubnaha ay eregooyinka Shirweynuhu si toos ah xor ah, qaab cod-bixineed oo qarsoodi ah isaga dhex doortaan shirweynaha.
3) Tirada xubnaha Golaha dhexe iyo habka isku dhafnaantooda iyadoo lagu sargoynayo tirada dadweynaha, tirada xubnaha Xisbiga iyo tixgalinta kaleduwanaashaha ayaa faah-faahinta hanaanka fulineed ee arrintaas uu Golaha dhexe Awaamiir ka soo saari;
4) Golaha dhexe lixdii biloodba mar ayuu yeelan shirkiisa caadiga ah. hase ahaatee, wakhti kasta uu ku qanco gudiga fulintu ama 1/3 xubnaha golaha dhexe ay codsadaan waxaa la iskugu yeedhi karaa shir degdeg ah;
5) Kooramka shirka golaha dhexe wuxuu ku qabsoomayaa marka ay xubnaha golaha dhexe 50%+1 shirka ka soo qayb galaan;
6) Go'aan kasta oo uu soo saaro golaha dhexe marka laga reebo

Komishinka dabagalka iyo Anshaxa, waxa uu fulitaan sharci ku yeelan dhamaan Hayadaha iyo Qaab-dhismeedyada Heerarka kala duwan ee Xisbiga;

7) Shirka Golaha dhexe waxaa si wada jir ah uu hoggaamin Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku-xigeenada ee Xisbiga;
8) Xilka iyo waajibaadyada Golaha dhexe waa sida hoos ku xusan:
   b). Waxa uu xaqiijiyaa dhaqangalka Barnaamijka siyaasadeed, Xeer hoosaadka iyo go'aanada shirweynaha Xisbiga;
   t) wuxuu hab waafaqsan jihooyinka guud, istiraatijiyadaha iyo Qorshayaasha siyaasadeed ee shirweynaha xisbigu u dejiyay ayuu Xisbiga ku hoggaamiyaa,sidoo kalena wuxuu soo saaraa Awaamiirta iyo nidaamyada lagu fulinayo go'aamadaasi, wuxuuna had iyo jeer qiimeeyaa habka fulintooda;
   j). Waxa uu dhegeystaa, isla markaana qiimeeyaa warbixinaha gudiga Fulinta, wuxuuna ka go'aan gaadha arrimaha u baahan go'aan;
   X). Wuxuu qiimeeyaa kadibna ansixiyaa ra'yi go'aanka heshiiska uu galo ama soo bandhigo Madaxwaynaha Xisbiga.
   d). Wuxuu soo saaraa Awaamiirta nidaamka doorashada Xisbiga.
   r). Waxa uu ansixiyaa isteraatiijiyada doorashada, wuxuuna aasaasaa guddi hogaamiya qaabsocodka doorashada loo gelayo.
   Sh) Waxa uu taabogeliyaa Qaab-dhismeedyada kale ee xisbi hadii loo baahdo;
   Dh) Waxa uu go'aamiyaa tirada iyo isku dhafnaanta xubnaha Golaha dhexe iyo gudiga Fulinta;
   sh). Waxa uu xubnahiisa ka dhex doorta xubnaha gudiga Fulinta ee Xisbiga;
   dh). Waxa uu ansixiyaa qorshaha shaqo iyo miisaaniyad- sannadeedka ee Golaha dhexe;
   c) Waxa uu Awaamiir kasoo saaraa nooca iyo cadadka qaadhaanka xubnaha Xisbiga iyo qaabka loo bixinayo.

g).Waxa uu go’aan ka gaadhaa is maan-dhaafka ka dhasha fasiraada qodobada Xeer hoosaadka Xisbiga;

f). Waxa uu fuliyaa waajibaadyada kale ee muhiimka u ah hirgalinta Barnaamijka iyo Xeerhoosaadka Xisbiga.

q) Wuxuu cod dhan 2/3 xayiraad ku saara xubanaha Golaha dhexe ee aan u hogaansamin Barnaamijka siyaasadeed iyo Xeer-hoosaadka Xisbiga islamarkaana ay liidato kartidooda Hoggaamineed.

k) Wuxuu ansixiyaa Awaamiir faah-faahsan oo lagu dhaqangalinayo Xeer- hoosaadka.

9) Iyadoo ay sideeda tahay arrimaha lagu Xeeriyay faqrada 8 ee xarafka (b) ilaa (k) ee qodobkan, Golaha dhexe wuxuu guud ahaan ama qayb ahaan waajibaadyadiisa shaqo u wakiilan karaa Guddiga Fulinta.

## *Qodobka 19aad :- Gudiga Fulinta ee Xisbiga*

1. Gudiga Fulinta ee xisbigu isaga oo hoos tagaya Golaha dhexe ee Xisbiga, ayaa codqarsoodi ah lagaga dhex doorani xubnaha Golaha dhexe;

2. Gudiga Fulinta ee Xisbiga waxaa hoggaamin madaxweynaha Xisbiga;

3. Gudiga Fulintu shirkooda caadiga waxay yeelan saddexdii biloodba Hal mar;

4. Shirarka degdega ah ee Gudiga Fulinta wuxuu qabsoomi kara marka uu iskugu yeedho Madaxweynaha xisbigu ama ay soo codsadaan 1/3 xubnaha Gudiga Fulintu;

5. Kooramka shirka gudiga fulintu waxa uu ku qabsoomi marka

xubnaha 50%+1 ay sooxaadiraan shirka;

6. Gudiga Fulinta ee xisbigu waxay yeelan xilka iyo waajibaadyada hoos ku xusan:
   - b). Waxa uu dabagalaa, jiheeynayaa, xaqiijiyaa dhaqangalinta qorshayaasha, jahooyinka, go'aanada iyo Awaamiirta ay bixiyeen shirweynaha iyo golaha dhexe ee Xisbiga;
   - t) Isaga oo ka duulaya go'aamada iyo jihooyinka shirweynaha iyo golaha dhexe, ayuu dejinayaa tabta wax lagaga bedelayo nolosha bulshada iyo sidii loo dhisi lahaa hal bulsho siyaasadeed dhaqaale, isaga oo ka bixinaya Awaamiirta ku haboona dabagal ku samaynayaa dhaqangelintooda;
   - j). Waxa uu curiyaa islamarkaana dabagalaa hirgalinta siyaasadaha xoojinaya midnimada iyo wadajirka Qowmiyadeheena iyo nidaamka Federaaliga ah;
   - x) Isaga oo ka duulaya go'aamada shirweynaha iyo golaha dhexe, islamarkaana raacayaa Xeer-hoosaadka Xisbiga lana kaashanayaa Komishinka dabagalka iyo Anshaxa ayuu soo saaraya Awaamiir lagu kobcinayo Xisbiga gudihiisa, sidoo kale, dabagal ku sameeya dhaqangelintooda;
   - kh). Wuxuu Golaha dhexe u soo gudbiyaa Qorshaha iyo warbixinta waxqabadka shaqo.
   - d). Waxa uu hogaamiyaa, dabagalaa islamarkaana taageero siiyaa shaqooyinka Qaabdhismeedyada Xisbiga Heerarka kale gadisan.
   - r). Waxa uu jaheeyaa islamarkaana Awaamiir ka bixiyaa shaqooyinka maalinlaha ah ee uu fulinayo xafiiska Xisbigu;
   - s). waxa uusoo saara Awaamiirta meelaynta hogaaminta.
   - Sh). Waxa uu dhisaa guddiga qaban-qaabada shirweynaha oo ka kooban guddiga Fulinta, Komishinka dabagalka iyo Anshaxa iyo qaybaha kale ee ay khusayso.

Dh). Waxaa uu diyaariyaa ajeendayaasha shirka golaha dhexe.

C ) Waxa uu dejiyaa tabaha iyo jihooyinka ku haboon gaadhsiinta xubnaha Xisbiga iyo guud ahaan bulshada barnaamijyada, jihooyinka iyo go'aamada Xisbiga; sidoo kale, xaqiijiyaa hirgalintooda.

7. Iyadoo ay sideeda tahay arrimaha lagu Xeeriyay faqrada 6 (b) ilaa (c) ee qodobkan, Guddiga Fulintu waxay waajibaadyadooda shaqo guud ahaan ama qayb ahaan u wakiilan karaa Madaxweynaha Xisbiga.

## *Qodobka 20aad :- Golaha /Fagaarha Wadajirka Hogaaminta Xisbiga Barwaaqo ee Heer Federaal iyo Deegaanaada*

i. Golahan waxaa hogaamin Madaxwaynaha Xisbiga ama mas'uulka uu u wakiisho waxaana Xubin kanoqon Madaxwayne kuxigeenada Xisbiga Barwaaqo, shirgudoonka gudiga xidhiidhinta Deegaanada, Madaxafiiseedada Xisbiga Barwaaqo ee Deegaanada iyo Xubnaha uu madaxwaynuhu u arko in ay muhiimyihiin ka qaybgalkooda.

ii. Golaha Wadajirku wuxuu hoostagaa Gudiga Fulinta

iii. Golaha Wadajirku wuxuu kulmi labadii biloodba halmar waxaana lagawada hadli xaaladda Dalka.

iv. Golaha Wadjirku wuxuu go'aaminayaa meelaynta Xubnaha Gudiga Xidhiidhinta Deegaanada.

v. Wuxuu uu hogaaminayaa islamarkaana hirgalinyaan jihooyinka lagu dajiyay Shirwaynaha, Golaha Dhexe iyo Gudiga Fulinta Xidbiga

## *Qodobka 21aad:- Madaxweynaha Xisbiga*

1. Madaxweynaha Xisbigu isaga oo hoos tagaya Golaha dhexe ayuu yeelan xilka iyo waajibaadyada hoos ku xusan: -
    b). Wuxuu hoggaaminayaa shirarka Golaha dhexe iyo Gudiga Fulinta;
    t) Waxa uu isku dubaridaa shaqooyinka golaha dhexe iyo gudiga Fulinta;
    j). Waxa uu dhaqangeliyaa go'aamada golaha dhexe iyo gudiga fulintu ay gaadhaan;
    x) Isaga oo metelaya Xisbiga ayuu xidhiidh shaqo la sameeyaa dhinacyada kala duwan, wuxuuna magaca Xisbiga ku sexeexa heshiisyada lala galo dhinacyo kale;
    kh). Wuxuu guddiga Fulinta u gudbiyaa warbixinta waxqabadkiisa shaqo;

    d) Waxa uu diyaariyaa ajendayaasha shirarka Gudiga Fulinta;

    r) Waxa kaloo uu fuliyaa waajibaadyada kale ee ay u xilsaaran Golaha dhexe iyo Gudiga Fulintu.

## *Qodobka 22aad:- Madaxwayne kuxigeenada Xisbiga*

1. Xisbigu wuxuu yeelan 2 madaxwayne kuxigeeno.

2. Madaxwayne kuxigeenadu waxay hoostagayaan Madaxwaynaha Xisbiga waxayna yeelanayaan waajibaadkan hoos ku xusan.
    B). Marka uu madaxwaynuhu maqanyahay Waxaa shaqada sii wadi madaxwayne kuxigeenka uu madaxwaynuhu wakiisho.
    T). Waxa ay qabanayaan shaqooyinka uu gudiga Fulinta iyo madaxwaynuhu u idmadaan.

## Qodobka 23aad :- Komishinka Dabagalka iyo Anshaxa

1 Komishinka Dabagalka iyo Anshaxu waxa uu ka koobnaanayaa xubno laga dhex doorto Shirweynaha Guud ee Xisbiga; tirada xubnaha Komishinkana waxaago'aamin shirweynaha ayay haddana noqon kuwo ku saleeysan tirada dadweynaha, tirada xubnaha Xisbiga iyo tixgalinta kaleduwanaanshaha; Golaha dhexe waxa uu Awaamiir kasoo saari faah faahinta habka loo qaybinayo saamiga metalaada ee qaybaha kale duwan si qaybaha bulsho ee laga tiro badanyahay ay u helaan metalaad.

2 Komishinku waxa uu hoos tagaa shirweynaha Xisbiga;

3 Xubnaha Komishinka laguma meelayn karo shaqo ka horimanaysa waajibaadyada shaqo.

4 Komishinku waxa uu yeelanayaa xafiis u gaar ah, hogaamin magaacabisah iyo khabiiro aan magacaabis ahayn;

5 Komishinku wuxuu Xafiisyo ka furaan Qaab-dhismeedyada kala duwan ee Xisbiga, wuxuuna ka taabogalin Qaab-dhismeedkiisa u gaarka ah iyo hawl wadeeno shaqo kuwaas oo qaab shaqeedkoodu noqonayo sida hoos ku cad:-

b). xubnaha Komishinka dabagalka iyo Anshaxa ee heer Deegaan iyo heer degmo waxaa lagu dooran konfaaransiyada/kulamada/fagaarayaasha Heerarka kala duwan ee Xisbiga. Haddii mudada u dhexeysa labada konfooraansi kulamada/fagaarayaasha ay dhinaadaan xubnaha Komishinku, Komishinku isagoo kala taashanayaa gudiga xidhiidhinta ee Heerarka kale duwan ayuu si ku meel-gaadha u buuxin booska banaan.

t). Komishinka dabagalka iyo Anshaxa ee heer Deegaan iyo Heerarka kale ee xisbigu waxay hoos tagaayaan Qaabdhismeedka Komishinka ee ka sareeya.

j). Qaabdhismeedyada Komishinka ee Federal iyo Heerarka kala duwan ee heer Deegaan ilaa heer tuulo waxay wada shaqeyn la yeelan gudiga xidhiidhinta ee goobahaasi.

6. Komishinku waxa uu yeelan xilka iyo waajibaadyada hoos ku xusan: -

b). Komishinku waxa uu dabagal ku sameeyaa xaqiijinta in sidii loogu baahnaa loogu dhaqmay Xeer hoosaadka iyo Awaamiirta shaqo ee Xisbiga;

t). Waxa uu dabagalkii loo baahna ku samaynayaa in siyaasada xisbigu loo fulieyey hab aragti caafimaad qabta iyo Anshax wanaag ku dheehantahay;

j). Waxa uu dabagal ku sameeyaa in lacagta, hantida iyo dukumentiyada Xisbiga loo isticmaalay sidii ugu haboonayd, wuxuuna ilaaliya in qaadhaan- bileedka xubnaha xilligii iyo sidii ugu haboonaydba loo soo ururiyo;

x). Waxa uu dabagalaa in la ilaaliyey xuquuqaha iyo faa'iidooyinka xubnaha Xisbiga;

kh). Waxa uu qaabilaa, baadhisna ku sameeya cabaashooyinka ay u soo gudbiyeen xubnaha xisbigu, wuxuuna ray'i go'aaneed u gudbiyaa Gudiga Fulinta iyo hadba sida kuhaboon gudiga xidhiidhinta ee goobtaasi si loo qaado tallaabooyin sixitaan.

D). wuxuu diyaariya Awaamiir la xidhiidha nidaamka Anshax iyo dabagal ee Komishinka, una gudbiyaa golaha dhexe, marka la ansixiyona wuu dabagalaa dhaqangalinta.

r). wuxuu dib u habeeyn ku sameeyaa nidaamka Anshaxa ee xubnaha Xisbiga, wuxuuna qaada talaabooyin lagula dagaalamayo ama lagaga hortagayo musuqa

s) Wuxuu baadha xadgudubyada Anshax xumo ee ka dhaca Qaabdhismeedyada kala duwan ee Xisbiga, wuxuuna suurtogaliyaa in la qaado talaabooyinka sixitaan ee ku haboon.

Sh) isagoo ka duulaya tilmaamaha iyo talooyinka laga siiyo guddiyada xidhiidhinta ee Xisbiga Wuxuu qaada talaabooyinka lagama maarmaanka ee laxidhiidha baadhista, dabagal iyo kormeerka.

Dh) markasta oo Qaabdhismeedyada Xisbiga ismaandhafyo ka dhashaan ama ay jiraan arrimo xisbi oo u baahan baadhis iyo xaqiijin iyo sidoo kale, haddii codsi uga yimaado Golaha dhexe ama guddiga Fulinta ee Xisbiga ayuu isagoo udhaqmayaa sida guddi madaxbanaan oo xaqiiqo raadis baadhis sameynayaa islamarkaana warbixin xambaarsan ra'yi go'aameed u soo gudbinayaa golaha dhexe ee Xisbiga.

C) Komishinku isagoo ka ambaaqadaaya xilka iyo wajibaadka lagu siiyay Xeer- hoosaadka Xisbiga ayuu qabanayaa daraasaadyo kala duwan oo la xidhiidha hawlaha dabagalka iyo baadhista. Kadibna natiijada daraasadka oo wadaata talo-bixintiisa ayuu u soo gudbiyaa qaybaha ay khuseeyso ee Xisbiga. dhaqangalinteedana dabagal ayuu ku sameeyaa.

G). wuxuu diyaarinayaa qorshaha miisaaniyada ee loo baahanyahy islamarkaana hordhigayaa golaha dhexe marka la ansixiyana wuu maamuli kuna fulini shaqooyinka loo idmaday.

f) wuxuu Xubnaha Komishinka ee aan u hoggaansamin Barnaamijka siyaasadeed iyo Xeer hoosaadka xusbiga uu cod 2/3 ah xilka kaga xiyirayaa;

k) wuxuu Warbixinta waxqabadka shaqo ee heer Federal uu gudbin shirweynaha Xisbiga; sidoo kale, hadba sida ay ugu haboontahay ayay Qaabdhismeedyada hoose ee Komishinku uu warbixintiisa shaqo u gudbin Qaabdhismeedka ka sareeyaa.

N) Isaga oo ka duulaya Xeer hoosaadkan ayuu soo saari karaa Awaamiir shaqo oo u gaar ah Qaab-shaqeedka Komishinka;

7. xilka iyo wajibaadyada Qaabdhismeedyada heer Deegaan iyo Qaabdhismeedyada hoose ee Komishinka dabagalka iyo Anshaxu waxay noqon kuwa lagu Xeeriyay farqada 6aad ee qodobkan.

8. Komishinku saddexdii (3) biloodba mar ayuu yeelan shirkiisa caadiga ah;

9. Komishinku isaga oo soo diyaarsanaya qorshe-sannadeedkiisa ayuu hoggaaminayaa dhaqangelintiisa.

10. Hadii gudiga fulintu aqbali waayo talaabooyinka sixitaan ee Komishinku u soo gudiyay, Komishinku talo-bixintiisa waxa uu u soo gudbin Golaha dhexe, go'aanka uu golaha dhexe gaadhana waxaa uu dhaqangal noqonaya ilaa shirweynaha xiga;

11. Komishinku waxaa uu iska dhex doorani Gudoomiye, Gudoomiye ku xigeen iyo xoghaye waxaa uuna hordhigayaa shirweynaha;

## *Qodobka 24aad:-. Xafiiska Guud ee Xisbiga*

1 Xafiisku isaga oo hoos taga Madaxweynaha Xisbiga, ayuu xafiis ahaan u qabanayaa shaqooyinka siyaasada, arrimah Xisbiga, xidhiidhka dadweynaha iyo kuwa heer caalami, sidoo kalana wuxuu xarun u noqonayaa daraasaadka iyo cilmi baadhista Xisbiga;

2 Xafiisku waxa uu yeelan Madax-xafiiseed iyo Ku-xigeeno sida loogu baahdo;

3 Xafiisku waxaa uu diyaarinaya qorshaha iyo warbixinihiisa una gudbinayaa madaxweynaha;

4 Xafiisku marka uu tashi lasameeyo hogaaminta Xisbiga ee Deegaanada musharixiinta gudiga xidhiidhinta Deegaanada kadib ayuu Madaxweynaha u gudbin kadibna ayaa lasoo jeedini ra'yi go'aameedka.faahfaahinta habka meeleynta waxaa Awaamiir ka soo saari golaha dhexe.

5 Faahfaahinta nidaamka shaqo ee xafiiska Guud iyo Xafiisyada Xisbiga ee Deegaanada waxaa lagu qeexi doonaa Awaamiirta uu ka soo saaro Golaha dhexe;

6 Xafiisku waxa uu yeelan xilka iyo waajibaadkan hoos ku xusan:-

b). Isaga oo ka duulaya qorshayaasha, go'aamada golaha dhexe iyo Gudiga Fulinta iyo jihooyinka uu siiyo madaxweynuhu ayuu diyaariyaa qorshaha shaqooyinka Xisbiga, islamarkaana kormeer iyo dabagal joogto ah ku sameeya dhaqangalkooda;

t). wuxuu dareen Masuuliyad sare leh ku maamulaa lacagaha, hantida iyo dukumentiyada Xisbiga, wuxuuna suuro geliyaa in si taxadar iyo feejignaan leh loo xafido sidii loogu talo galayna loogu shaqeeyo; wuxuuna suurtogaliyaa sidii lacagaha iyo dokumeentiyada xisaabeed ee Xisbiga sanadwalba baadhitaan xisaabeed ugu sameeyaan hantidhawro dibaadeed ama kuwa kale.

j). Waxa uu fuliyaa Qaab-dhismeedyada xubnaha, kobcinta garaadka siyaasaded,xidhiidhka dadweynaha,kuwa calami iyo hawlaha cilmi baadhista iyo daraasaadka iyo waajibaadyada kale ee la xidhiidha.

x) Isaga oo ka duulaya Awaamiirta uu siiyo madaxweynuhu

ayuu magaca Xisbigakula xaajoon kara cid Saddexaad;

kh). Isagoo la tashanaya Madaxweynaha ayuu magacaabaa diyaariyaha Guud eeWargeyska Xisbiga iyo Xubnaha Golaha wargeyska.

d). Waxa uu maamulaa miisaaniyada Xisbiga loo ansixiyey;

r). Barnaamijka Xisbiga, jihooyinka, habka Fulinta shaqo iyo qorshayaasha Xisbiga ayuu qaybaha warbaahinta iyo xidhiidhka dadweynaha ugu bandhigayaa Shacabka;

s). Wuxuu Magaca Xisbiga ku gali karaa heshiiyo, wax ku dacweeyaa laguna dacwayn kara.;

sh). Wuxuu hab wafaaqsan Awaamiirta maamulka cududa shaqaalaha Xisbiga ayuu

shaqaalaha umaamula, udabagalaa islamarkaana shaqada uga eryaa shaqaalaha.

dh). Wuxuu diyaariyaa taariikhda, Goobta iyo Ajandeyaasha Shirweynaha marka la go'aamiyana waxa uu u gudbiyaa Qaabdhismeedka xisbi ee ay khusayso.

c). Waxa uu isku dubaridaa shaqooyinka hayada latalinta Xisbiga.

g).. Waxa uu fuliyaa hawlaha kale ee ay u xilsaaraan Golaha dhexe, Gudiga Fulinta ama Madaxweynaha xisbigu.

7. Iyadoo arrimaha lagu Xeeriyay farqada 6 ee qodobkani xarfaha B ---G ay sideeda yihiin, waxa uu diyaariyaa Awaamiirta lagu Xeeriyay Xeerhoosaadkan waxaa kale oo uu sababaa in lasoo saaro Awaamiirta kale ee muhiimka u ah hirgelinta shaqooyinka Xisbiga isagoo la kaashanaya golaha la talinta Xisbiga ayuu u gudbiyaa Madaxweynaha.

8. Iyadoo arrimaha lagu Xeeriyay farqada 6 ee qodobkani ay sideeda tahay, ayuu Xafiiska Guud ee xisbigu waxa uu Xilka iyo waajibaadkiisa u wakiilan karaa Xafiisyada Xisbiga ee Deegaanada, Adhis ababa iyo diridhaawa.

# Cutubka Afraad

## IV. Qaabdhismeedka Xisbiga ee Heer Deegaan

### *Qodobka 25aad:- Qaabdhismeedka Xisbiga*

1. Waxaa hab wafaaqsan Xeer-hoosaadkani la aasaasay xafiisyada Xisbiga Laantooda Deegaanka iyo labada maamul magaalo oo loogu yeedhayaa magaca Deegaankooda oo hoostegaya xafiiska guud ee Xisbiga;-

   b) Xisbiga Barwaaqo Laanta Xafiiska Deegaanka Oromada.

   t) Xisbiga Barwaaqo Laanta Xafiiska Deegaanka Axmaarada.

   j) Xisbiga Barwaaqo Laanta Xafiiska Deegaanka Shucuubta Koonfureed.

   x) Xisbiga Barwaaqo Laanta Xafiiska Deegaanka Soomaalida.

   Kh) Xisbiga Barwaaqo Laanta Xafiiska Deegaanka Tigray.

   d) Xisbiga Barwaaqo Laanta Xafiiska Deegaanka Canfarta.

   r) Xisbiga Barwaaqo Laanta Xafiiska Deegaanka Beenshaangulka

   s) Xisbiga Barwaaqo Laanta Xafiiska Deegaanka Gambeela

   sh). Xisbiga Barwaaqo Laanta Xafiiska Deegaanka HARAARIDA

   dh). Xisbiga Barwaaqo Laanta Xafiiska Deegaanka Sidaama

   c). Xisbiga Barwaaqo Laanta Xafiiska Deegaanka Koonfur Galbeed

   g). Xisbiga Barwaaqo Laanta Xafiiska Deegaanka Ismaamulka Addis Ababa

   F) Xisbiga Barwaaqo Laanta Xafiiska Deegaanka Ismaamulka Diridhaba

2. Deegaanadu waxay gobollada, degmooyinka (degmo gaar ah), magaalooyinka ku yeelani xafiisyo xisbi oo hoostega Laanta Xafiiska Xisbiga ee Deegaan .

3. Xafiisyada lagu aasaasay hab waafaqsan farqada (1) ilaa (2) ee Qodobkan waxay heerkasta ku yeelan Koonfaransiyo/kulamo xisbi, Guddiga xidhiidhinta, Xafiisyo iyo Guddiyada Dabagalka iyo Anshaxa.

4. Xafiisyada Xisbiga ee heer Deegaan ee lagu Xeeriyay farqada 1 ee qodobkani, waxay sidoo kale xafiisyo xisbi ku yeelan Deegaanada loo asaaso hab wafaaqsan qodobada 47 ee Dastuurka jaamuriyada demoqraadiga Federaalka Itoobiya.

5. Qaabdhismeedyada kala duwan ee xisbi ee ka jiraa Deegaanku waxay noqon kuwa ka qayb galinya dhamaan xubnha Xisbiga islamrkaana xaqiijiyaa metaalada qaybaha kaleduwan ee bulshada.

## Qodobka 26[aad:] - Nidaamka shaqo ee Koonfaransiga/kulamada/fagaarayasha Xisbiga ee Deegaanada iyo Ismaamulka Magaalooyinka Addis Ababa iyo Diridhaba

1. Koonfaransiyada/kulamada/fagaarayaasha Xisbiga ee laga qabanayo Heerarka kala duwani waxay noqonayaan fagaarayaal kor loogu qaadayo kobcinta wacyiga iyo garaadka siyaasadeed ee xubnaha Xisbiga.

2. Metalaada iyo isku dhafnaanta xubnaha Xisbiga ee ka qayb galaya Koonfaransiyada/kulamada Xisbiga waxaa lagu jaango'yn tirada xubnaha Xisbiga.

3. Koonfaransiyada Xisbiga ee Heerarka kala duwan iyagoo ku qabsoomayaa yeedhitaanka guddiga xidhiidhinta Xisbiga ee heerwalba ka dhisan ayay kuwa heer Deegaan, magaalada adhis ababa iyo ismaamulka Diri Dhaba ay sanadkiiba hal mar ay shirayaan. Halka Koonfaransiyada heer gobol, degmo/degmo gaar ah iyo heer magaaloba ay yeelanayaan sanadkiiba labo jeer iyo sidoo kale heer tuulona sadeexdii biloodba mar iyo Unug aasaasiyada Xisbiga oo bilkasta yeelanayaa Koonfaransiyo
4. Xalaada guud ee g/socodka shaqo iyo xaalada siyaasadeed ee Komishinka dabagalka iyo Anshaxa ee heer Deegaan waxaa lagu qiimayn Koonfaransiyada xisbi ee heerDeegaan.

## *Qodobka 27aad: - Xilka iyo Waajibaadka Koonfaransiga Xisbiga*

1 Waxaa lagu xaqiijinayaa in si haboon Heerarka kala duwan looga dhaqangeliyay Barnaamijyada siyaasadeed iyo Xeerhoosaadka Xisbiga.
2 Waxaa uu hubiyaa in si haboon loo dhaqangeliyay jihooyinka, go'aanada iyo qorsheyaasha Xisbiga.
3 Waxa uu suurtogeliyaa kobcinta iyo dhismaha wacyiga iyo garaadka siyaasadeed ee xubnaha Xisbiga.
4 Waxaa Hab waafaqsan Awaamiirta hanaanka ka qaybgalka iyo metalaada Shirweynaha iyo koonfaransiyada Xisbiga ayey ku metalayaan xubnaha ka qaybgalaya shirweynaha iyo konfaransiyada heerarkooda kala duwan ee Xisbiga.
5 Waxa uu dhagaystaa, Qiimeeyaa islamarkaana ansixiyaa Warbixinaha iyo qorsheyaasha shaqo ee ay usoo gudbiyaan Guddiga xidhiidhinta ee Goobtaas iyo Komishinka dabagalka iyo Anshaxa.
6 Iyadoo la raacayo Jihooyinka guud ee Xisbiga iyo go'aanada

Xisbiga ee ku haboon iyo sidoo kale jahooyinka ay siiyaan hogaaminta Qaabdhismeedyada Xisbiga ee heer Qaran Konfaraansiyada Xisbiga ee ka jiraa Heerarka kala duwan, shirweynaha Xisbiga , guddiga golaha dhexe ee Xisbiga iyo guddiga Fulinta ee xisbigu waana fagaaraha xisbi ee ugu weyn aaggaa Qaabdhismeedka maamul ee heerkaasi.

### *Qodobka 28aad :- Gudiga hogaaminta ee heer Deegaan, Adhis ababa, Diri Dhaba iyo Xafiisyada Heer Federaal*

1. Guddiga hogaaminta Xisbiga ee heer Deegaan, Addis Ababa iyo Diri Dhaba waxay hoostegayaan Guddiga Fulinta ee Xisbiga.
2. Gudiga Xidhiidhinta Xafiisyada Heer Fadaraal wuxuu hoostagayaa Xafiiska Xisbiga Barwaaqo ee Heer Fadaraal.
3. Guddiyada Xisbiga ee ka dhisan heer Gobol, Degmo (Degmo gaar ah), Magaalo ama Tuulo waxay hoostegayaan Guddiga xidhiidhinta ee ka dhisan QaabdhismeedkaXisbiga ee jaran-jarada ka sareysa.
4. Shirka caadiga ah ee Guddiga hogaaminta Xisbiga ee heer Deegaan, magaalada Addis Ababa iyo Diri Dhaba wuxuu qabsoomayaa bishiiba halmar, halka Shirka caadiga ah ee Guddiga xidhiidhinta ee heer Gobol, Degmo (Degmo gaar ah), Magaalo ama Tuulo uu qabsoomaya bishiiba labo jeer.
5. Guddiyada xidhiidhinta ee ka dhisan Heerarka kala duwan waxay yeelan Xilka iyo waajibaadyada hoos ku cad:
   - b). Waxa ay hogaamin arrimaha siyaasadeed iyo shaqooyinka Xisbiga ee aggaas.
   - t) Waxa uu dhaqangeliyaa go’aanada iyo Awaamiirta kasoo fusha hogaaminta sare ee Xisbiga. sidoo kale waxa uu soo saaraa qorsheyaal faahfaahsan oo lagu dhaqangelinayo shaqooyinkooda.

j). waxay warbixinta waxqabadka shaqo u gudbiyaan guddiga xidhiidhinta ee haykaalka ka sareeya;

x) Jahooyinka fulineed ee lagu dejiyo koonfaraansiyada xisbi ee Heerarka kala duwan waxaa loo dhaqangalin hanaan ixtiraamaya jihooyinka Hoggaamineed iyo go'aanada ka soo baxaa shirweynaha Xisbiga, golaha dhexe ee Xisbiga iyo guddiga Fulinta ee Xisbiga.

kh). Iyadoo ay dhawrsoontahay jihooyinka Hoggaamineed ee ka soo baxa Qaabdhismeedyada xisbi ee ka dhisan heer Qaran, waxay soo curinayaan arrimaha siyaasadeed ee heer Deegaan iyo degmo.

t) Tirada, isku dhafnaanta iyo meelaynta xubnaha guddiga xidhiidhinta ee heer Deegaan iyo Qaabdhismeedka hooseba waxaa lagu go'aamin Awaamiir u soo saaro golaha dhexe ee xisbigu.

## *Qodobka 29aad:-Xafiisyada Xisbiga ee Heerarka kaladuwan*

1. Xafiisyada Xisbiga ee Heerarka kala duwani waxay xarun u noqon arrimaha siyaasadeed, xisbinimo iyo xidhiidhka dadweynaha ee Xisbiga;
2. Xafiisyadani waxay hoostagaayan, xafiiyada Xisbiga ee ka dhisan Qaab-dhismeedyada xisbi ee hal derajo ka sareeya.
3. Xafiisyadani waxaa hogaamin ama ay yeelan masuuliyiin/ madaxa iyo ku xigeeno hadba sida loogu baahdo ay magacaaban guddiga Fulinta ee xisbigu ama guddiyada xidhiidhinta ee kadhisan Heerarka kala duwan.
4. Xafiisyadani Xisbigu waxay yeelan xilka iyo waajibaadyada hoos ku cad:-

   b). Waxay qorsheeyaan, dabagalaan ismarkaana fuliyaan shaqooyinka siyaasadeed iyo arrimaha Xisbiga ee Deegaanka, Addis Ababa iyo Diri Dhaba.

t). waxay ay maamulayaan lacagaha, hantida iyo dukumentiyada maaliyadeed ee Xisbiga, waxayna suurtogalinayaan in loo xafido hanaan ay ku dheehantahay hufnaan iyo taxaadir gaar ah;

j). waxay fulinayaan shaqooyinka Qaabdhismeedka Xubnaha, Kobcinta garaadka Siyaasadeed, Xidhiidhka Dadwaynaha iyo shaqooyinka kale ee loo idmaday.

x). Waxa uu fuliyaa shaqooyinka Qaabdhismeedka iyo abaabulka xubnaha Xisbiga, kobcinta garaadka siyaasadeed, xidhiidhyada calaamiga iyo arrimaha xidhiidka dadweynaha iyo hawlaha kalaba;

kh) Waxay hab wafaaqsan jahooyinka iyo tilmaamaha shaqo ee ka soo baxa xafiiska Guud ee Xisbiga, ayay iyagoo metelaya Xisbiga xidhiidha wada shaqeeyn la yeelan dhinacyada Saddexaad ee Heerarka kala duwan.

d) Isagoo ka duulaya jihooyinka uu siiyo xafiiska guud ee xisbigu ayuu Barnaamijka Xisbiga, jihooyinka Xisbiga, warbixinaha waxqabadka shaqo iyo qorshayaasha shaqo ay Shacabka kula socodsiin/gaadhsiin aaladaha warbaahinta iyo Tabaha xidhiidhka dadweynaha;

r) waxay hab wafaaqsan Awaamiirta maamulka cududa shaqaale ee Xisbiga ku shaqaaleeynayaa, maamulayaa, shaqadana ka cayrinayaa shaqaalaha xafiiska;

5. Waxa kale oo ay qabtaan shaqooyinka kale ee ay u xilsaaran Qaabdhismeedyada Heerarka kala duwan ee Xisbigu.

6. Waxaa ay diyaarsanayaan Qorshayaasha shaqo iyo warbixinahawaxqabad ugudbinyaan Xafiisyada Xisbiga ee ka sareeya;

## *Qodobka 30aad :- Garabka Haweenka ee Xisbiga Barwaaqo*

1. Hadafka ugu muhimsan ee garabka Haweenka ee Xisbiga Barwaaqo waa xaqiijinta ka qaybgalka dhinacyada kala duwan ee Haweenka ku jira Qaabdhismeedka Xisbiga gudahiisa iyo dibaadiisaba , ilaalinta xuquuqaha Haweenka iyo ka fa'iidaysi cadaali ah islamarkaana si loo gaadho horumar iyo badhaadhedhinacyo badan leh Dalkeena iyo shacabkeedu gaadhaan waa in Haweenka loo abuuro tubta iyo jawiga ku haboon ee ay door lama huraan ah ugu yeelan karaan g/socod lagu xaqiijinayo ka qaybgalka iyo ka faa- iidaysiga Haweenka ay ku yeeshaan door gadhwadeenimo, abaabul iyo Hoggaamineedba.

2. Si kor loogu qaado loona kobciyo ka qaybgalka iyo ka faa-iidaysiga Haweenka ee dhinacyada siyaasada, arimaha bulshada iyo dhaqaaleba, waxay cod iyo fagaare halgan u noqon Haweenka.

3. Haweenka ka tirsan Xisbiga Barwaaqo waxay xubin ka noqon karaan garabka Haweenka ee Xisbiga Barwaaqo.

4. Garabka Haweenka ee Xisbiga Barwaaqo waxay yeelan Xeer hoosaad iyo Awaamiiro shaqo oo u gaara ah, kuwaasi oo aan ka hor imanayn Xeer hoosaadka iyo Awaamiirta shaqo ee Xisbiga

5. Garabka Haweenka ee Barwaaqo waxay yeelan qaab dhismeedyo barbarsocda ama la gudboon Qaabdhismeedyada Xisbiga ee ka jira Heerarka kala duwan.

6. Qaab-dhismeedyada Hoggaamineed ee Xisbiga ee ka jira Heerarka kala duwan waxay Qaabdhismeedyada garabka Haweenka ee Barwaaqo ee ka dhisan dhigooda ama heerkooda ay siin taageero iyo takulayn Hoggaamineed oo joogto ah.

7. Madaxa iyo ku xigeenka Qaab-dhismeedyada Hoggaamineed ee ka baxsan xubnaha gudiga Fulinta ee Xisbiga ee ka dhisan Heerarka kala duwan waxay iyagoon cod lahayn ka qaybgali karaan shirarka Qaabdhismeedyada Hoggaamineed ee Xisbiga ee ka jira heerka dhigooda.

8. Garabka Haweenka ee heer Federal isaga oo latashanaya xafiiska guud ee Xisbiga ayaa waxauu soo diyaarini Awaamiir la xidhiidha wadashaqaynta uu garabka Haweenka layeelanayo hayadaha iyo hogaaminta Xisbiga si loogu ansixiyo.

## *Qodobka 31[aad:] - Garabka Dhalinyarada ee Xisbiga Barwaaqo*

1 Hadafka ugu muhiimsan ee garabka Dhalinyarada ee Xisbiga Barwaaqo waa in si loo xaqiijiyo horumar iyo badhaadhe dhinacyo badan oo Itoobiya iyo shacabkeedu gaadhaan Dhalinyarada loo abuuro tubta iyo jawiga ku haboon ee ay doorka lama huraanka ah ee looga baahanyahay sida ugu haboon u gutaan islamarkaana ay si loo xaqiijiyo ka qaybgalka iyo ka faa-iidaysiga Dhalinyarada la siiyo door abaabul iyo Hoggaamineedba.

2 Si kor loogu qaado loona kobciyo ka qaybgalka iyo ka faa-iidaysiga dhalinyarta ee dhinacyada siyaasada, arimaha bulshada iyo dhaqaaleba, waxay dhalinyarta u noqon cod iyo fagaaraha halgan ee Dhalinyarada.

3 Muwaadinkasta oo Itoobiyaan ah oo da,'diisu u dhaxayso 14-35 sano wuxuu xubin ka noqon karaa garabka dhalinyarta ee Barwaaqo. faaf-faahinta hanaanka fulineed ee arrintaas waxaa lagu Xeerin Awaamiirta shuruudaha iyo qaab shaqeedka ee uu soo saarayo garabka Dhalinyarada ee Xisbiga Barwaaqo.

4 Qofkasta oo da'diisu ka sarayso 18 sano jir oo xubin ka ah garabka Dhalinyarada ee Barwaaqo waa inuu noqdaa xubin katirsan Xisbiga.

5 Garabka Dhalinyarada ee Xisbiga Barwaaqo waxay yeelan Xeer hoosaad iyo Awaamiiro shaqo oo u gaara ah, kuwaasi oo aan ka hor imanayn Xeer hoosaadka iyo Awaamiirta shaqo ee Xisbiga

6 Garabka Dhalinyarada ee Barwaaqo waxay yeelan qaab dhismeedyo barbarsocda ama la gudboon Qaabdhismeedyada Xisbiga ee ka jira Heerarka kala duwan.

7 Qaab-dhismeedyada Hoggaamineed ee Xisbiga ee ka jira Heerarka kala duwan waxay Qaabdhismeedyada garabka Dhalinyarada ee Barwaaqo ee ka dhisan dhigooda ama heerkooda waa inay siiyaan taageero iyo takulayn Hoggaamineed oo joogto ah.

8 Madaxa iyo ku xigeenka Qaab-dhismeedyada Hoggaamineed ee ka baxsan xubnaha gudiga Fulinta ee Xisbiga ee ka dhisan Heerarka kala duwan waxay iyagoon cod lahayn kaqaybgali karaan shirarka Qaabdhismeedyada Hoggaamineed ee Xisbiga ee ka jira heerka dhigooda.

9 Xubinkasta oo ka tirsan garabka Dhalinyarada ee Barwaaqo ee aan ahayn xubin buuxa oo ka tirsan Xisbiga uma tartami karo boosaska masuuliyadeed ee Xisbiga ee qaab doorasho lagu hanto ama qabto.,sidoo kale, hadii aan si gaara loogu casuumin kama qaybgali karo shirarka xubnaha ama hogaaminta Xisbiga.

10 Garabka Dhalinyarda ee heer Federal isaga oo la tashanaya xafiiska guud ee Xisbiga ayaa waxauu soo diyaarini Awaamiir la xidhiidha wadshaqaynta uu garabka Dhalinyarada layeelanayo hayadaha iyo hogaaminta Xisbiga si loogu ansixiyo.

# Cutubka Shanaad

## V. Qodobo kala duwan

### *Qodobka 32aad:- Muddo Xilleedka*

1 Muddo xilleedka ugu badan ee Madaxwaynaha iyo Madaxweyne ku xigeenada xisbigu waa ilaa muddo toban sano ah. muddo xilleedka hogaaminta kale ee Xisbiga waxaa Awaamiir ku go'aamin golaha dhexe ee Xisbiga.

2 Da'da hawlgabka hogaaminta xisbigu waa 65 sano.

### *Qodobka 33aad :- Illaha Maaliyadeed ee Xisbiga*

Illaha maaliyadeed ee xisbigu waxay noqon qaadhaan-bileedka xubnihiisa iyo tageerada uu xisbigu hab waafaqsan shuurucda Dalka u ka helo taageerayaasha iyo ilaha kale ee sharciga ahba.

### *Qodobka 34aad :- Nidaamka shaqo ee hanaanka maamulka shaqaalaha, hantida, arrimahaMaaliyadeed iyo Diiwaanada Xisaabaad ee Xisbiga*

1. Nidaamka mamul ee Cududa shaqaale, arrimaha Maaliyadeed iyo Hantida Xisbiga waxaa loo mari ama lagu maamulayaa hab wafaaqsan Awaamiirta uu Golaha dhexe u soo saaro;

2. Xisbigu waxa uu xafidayaa diiwaanada iyo dhokumeentiyada xisaabaad oo dhamaystiran islamarkaana sax ah; waxaana sannad kasta baadhayaa hanti-dhawrka gudaha iyo kuwo dibaadeed.

3. Awooda go'aan ka gaadhida hantida iyo maaliyada Xisbiga waxaa iskaleh Golaha Dhexe

4. Qodobkan qodob hoosaadkiisa 3aad iyada oo ay ku cadahay hadana Golaha dhexe wuxuu u wakiilan karaan Gudiga Fulinta.

## Qodobka 35aad :- Nidaamka Xalinta Khilaafaadka ka dhex yimaada Xisbiga gudahiisa

1. Ismaan-dhaafyada ka dhex aloosma xubnaha iyo Qaabdhismeedka Xisbiga gudihiisa waa in lagu xaliyo hab wafaaqsan nidaamyada shaqo ee lagu qeexay Xeer hoosaadkan;
2. Hadii lagu xalin kari waayo hanaanka lagu tilmaamay farqada 1 ee qodobkan, waxaa lagu xalinayaa hab waafaqsan Sharciga Doorashooyinka diiwaangelinta xisbiyada siyaasadeed iyo Anshaxa doorashooyinka ee Dalka iyo shuruucda kale.

## Qodobka 36aad: - Nidaamka isku biirida/Midow , iskaashi iyo isbahaysi ga ee Xisbiyada kale

1 xisbigu waxaa uu la midoobi karaa ama iskaashaysi ama isbahaysi la sameeysan karaa xisbi kale ama xisbiyo kale.

2 Arrimaha lagu Xeeriyay farqada (1) ee Qodobkan waxay dhaqangal noqonayaan marka Golaha dhexe uu xaqiijiyo in talaabadaasi waafaqsantahay Bayaanka Doorashooyinka, Diiwaangelinta Axsaabta Siyaasadeed iyo Anshaxa doorashooyinka.

3 Golaha dhexe Kadib marka uu xaqiijiyo in go'aanka midowga ama bahwadaagtu ama isbaahaysigu waafaqsan yahay Bayaanka Doorashooyinka, Diiwaangelinta Axsaabta Siyaasadeed iyo Anshaxa doorashooyinka ee Itoobiya oo ay aqbaalan ray' igo'aameedka midowga ama dhismaha bahwadaag ama isbaahaysiga waxay u gudbin shirweynaha Xisbiga si loo ansixiyo.

## Qodobka 37aad :- Burburka Xisbiga

Shirweynaha Xisbigu wuxuu ugu yaraan cod dhan ¾ ku go'aamin kara in Xisbiga la baabi'iyo.

## Qodobka 38aad: - Golaha La-talinta ee Xisbiga

1. Xisbigu si uu u taabogaliyo ujeedooyinkiisa siyaasadeed, arrimo bulsho iyo dhaqaale wuxuu aas-aasi karaa golaha la talinta ee Xisbiga oo ka kooban aqoonyahanka iskugu jira xirfado kala duwan iyo dadka caanka ee magaca iyo sumcada ku dhex leh bulshada.

2. Iyada oo uu sidiisa yahay arrimaha lagu Xeeriyay farqada 1 ee qodobkan, guddiyada xidhiidhinta ee heer Deegaan marka uu soo bandhigo una soo jeediyo madaxa Xafiiska Xisbiga ee Deegaanku, waxay aasaasi karaan Golaha la talinta ee Xisbiga ee heer Deegaan.

## Qodobka 39aad: - Sarraynta Xeer Hoosaadka Xisbiga

1 Xeer-hoosaadkani Maadaama u yahay sharciga ugu sareeya ee Xisbiga, wuxuu dhaqangal sharci oo muqadis ah ku yeelanayaa Qaabdhismeedyada iyo xubnaha kala duwan ee Xisbiga.

2 Marka ay iska hor imaanayaan Xeer hoosaadkan iyo Awaamiirta/Qoraalada kale ee Xisbiga, waxaa la raacayaa oo sareeyn yeelanayaa Xeer hoosaadka.

## Qodobka 40aad: - Awooda soo saarida Awaamiirta

Iyada oo ay sideeda tahay awooda Hay'adaha kala duwan ee Xisbiga lagu siiyey hab wafaaqsan Xeer hoosaadkan, Golaha dhexe ee xisbigu wuxuu soo saari karaa Awaamiiro waxku ool u ah hirgalinta qodobada Xeer hoosaadkani.

## *Qodobka 41aad:- Hanaanka Dib U Habaynta, Wax Ka Bedelka Iyo Burinta Xeer Hoosaadkan*

1 Xeer hoosaadkan waxa dib u habayn, waxka badal ama lagu burin kara shirweynaha Xisbiga oo keliya.

2 Iyada oo uu sidiisa yahay arrimaha lagu Xeeriyay farqada 1 ee qodobkan, fikirka dib uhabaynta Xeer hoosaadka waxaa soo jeedin kara:-

b) Madaxweynaha ama

t).Marka xubanaha golaha dhexe ku tageeran cod dhan 1/3 ; ama

j). Marka ay xubnaha Gudiga Fulintu cod aqlabiyad ah ku taageeraan.ama

x). marka ay tageeraan kala baadh (1/2) xubnaha Komishinka dabagalka iyo anshuxu.

3 Hindisaha soo jeedinta dib u habaynta Xeer-hoosaadka ee ku cad farqada 2 ee qodobkani, waxaa Shirwaynaha Xisbiga la horgeyn karaa marka ay isku raacaan aqlaabiyada xubnaha Golaha dhexe ee Xisbiga.

4 Hindisaha soo jeedinta dib u habaynta Xeer-hooosaadka ee golaha dhexe ku soo bandhigayo hab waafaqsan farqada3 ee qodobkani, haddii shirweynaha xisbigu ku go'aamiyo cod aqlaabiyad ah ayaa la habeeyn ama wax laga bedeli Xeer-hoosaadka.

## *Qodobka 42aad :- Mudada Dhaqangalka Xeer Hoosaadkan*

Xeer-hoosaadkanu wuxuu dhaqangal noqon laga bilaabo maalinta oo lagu ansixiyay Shirwaynaha koobaad ee Xisbiga Barwaaqo.

*Magaabiid 2014.*
*Xisbiga Barwaaqo (Barwaaqo)*
*Addis Ababa*